Xaalada Dhukumiintiga: **La ansixiyay**

| | |
|---|---|
| IDENT | UVMHN_CUST1 |
| Nooca Dhukumiintiga | Xeerka |
| Nooca U qalmida | Shabakada |
| Taariikhda Dhaqangalka | 6/6/2024 |
| Taarikhda Dib u eegista Xigta | 6/6/2025 |

University of Vermont Health

**CIWAANKA:** Deynta iyo Uruurinta

**UJEEDADA:** Si loo xaqiijiyo biilka, lacag bixinta, nidaamka aruurinta ee loo maro habraacyada maamulka u degsan ee wax ku oolka ah ee uu qofku lacagta iskaga bixinaayo keenaysana nidaamka joogtada ahna caddaalada ee la xarira aruurinta deynta.

**BAYAANKA XEERKA:** University of Vermont Health Network (UVMHN) waa urur udub dhexaad u ah bukaanka oo ay ka go'an tahay inuu dhamaan bukaanaada ula dhaqmo si siman, leh xushmad iyo sumcad ayadoon eegeyn dheefaha caymiska daryeelka bukaanka ama kheyraadka dhaqaalaha. UVMHN wuxuu abuuray hadaf aad u adag oo uu ku buuxinaayo baahiyaha caafimaadka ee ay qabaan bulshooyinka uu u adeego. Xeerka isku dhafka ah ee haboon waa xeer aasaas ah oo muhiim u ah hadafka. Sida, UVMHN wuxuu joogteyn doonaa siyaasada kala xariirida masuuliyada dhaqaalaha bukaanka ee hore, joogtada ah iyo/ama kuwa loo maraayo nidaamka lacag bixinta, filashada lacag bixinta waqtiga adeega la bixinaayo iyo/ama wakhtiga lacag bixinta hore. Shakhsiyaadka hela adeegyada waxaa laga filayaa inay bixiyaan adeegyada iyo/ama inay helaan qaab hal kale ah oo ay kujiri karaan caymiska lagu daboolo adeegyada caafimaadka, qorshaha lacag bixinta ee la ansixiyay iyo/ama haddii ay u qalmaan barnaamijka kaalmada dhaqaalaha. Marka la sameeyo dhammaan dadaalada lacagta looga helaayo bukaanka ama kaalmo looga helaayo barnaamij kaalmo lagu guuldaraysto, kharashka adeegyada waxaa loo gudbin doonaa hay'ad saddexaad oo lacagta aruurisa dhammaadka wareega lacag bixinta. University of Vermont Health Network ma sameyso tallaabooyinka lacag aruurinada ee aan habbooneyn waxayna sameysaa iskudayo macquul ah si ay ula socodsiiso, u ogeysiiso, una dhiirigeliso bukaanada inay codsadaan kaalmo dhaqaale marka ay wajahayaan xaalad adag. University of Vermont Health Network cidna kuma takoorto arrimo ku saleysan jinsiyada, midabka, jinsiga, nooca galmada, aqoonsiga jinsiga ama nooca qofku u eg yahay, meesha uu kasoo jeedo, meesha uu ku dhashay, xaalada HIV, dalka uu kasoo jeedo, xaalada socdaalka, diinta, xaalada guurka, iyo da'da, luuqada, xaalada dhaqan dhaqaale, naafonimada jirka ama maskaxda, xaalada halyeynimada ama helida adeegyada ciimada qalabka sida.

**HABRAACA:**

1. UVMHN waxay bukaanada aan caymiska lahayn iyo kuwa lacag iska bixiya siin doontaa foomka qiyaaska kharashka ee adeegyada ay u ballansan yihiin inay maraan, sida sharciyada iyo xeerarku dhigayaan.

2. Marka UVMHN siiso bukaanada qaar kamid ah adeegyada kooxaha aan shabakada ku jirin ama qorshooyinka caymiska shakhsi ahaaneed, UVMHN waxay bukaanka kusoo rogi doontaa kaliya qoondada lacagta caymiska ama cadadka boqolkiiba go'an ee laga qaadi lahaa haddii bukaanku kujiri lahaa shabakada caymiska. Kuwaan waxaa kamid ah adeegyada iyo alaabaha la xariira daawooyinka xaaladaha degdega ah, suuxdinta, caafimaadka guud, raajada, iyo dhakhtarka dhalaanka.

3. UVMHN waxay sheegashooyin u gudbin doontaa shirkadaha caymiska waxayna kala shaqeyn doontaa fududeynta hawsha lacag bixinta. Bukaanka ayaa masuul ka ah u hogaansamida dhammaan oggolaanshaha hore, xaqiijinada hordhaca ah, gudbinta, iyo waxyaaabaha kale ee uu dhigaayo sharcigu. Xeerka caymiska bukaanka waa heshiis u dhaxeeya bukaanka iyo shirkada caymiska; ma ahan heshiis u dhaxeeya UVMHN iyo shirkada caymiska.

4. Xaqiijinta damaanad qaadida waxay go'aamisaa cida masuulka ka ah haraadiga la bixinaayo. Dadka waawayn ayaga ayaa masuul iska ah iyagoo sidoo kale masuul ka ah ilmahooda yaryar. Haddii shaqsiyaadka reer leeyihiin, bukaanka ayaa masuul ka ah masuuliyada lacag bixinta kama dambeysta ah ayadoon la eegeyn cida caymiska leh.

5. Cida damaamad qaaday ayaa kharashka lagu dalici doonaa bil walba (maalinta 28-aad ee bisha) gaar ahaan dhammaan lacagta haraadiga ah ee la go'aamiyo inuu masuulka ka yahay. Bayaanada waxaa la diri doonaa kadib caymisyadu ay meelmariyaan sheegashooyinka iyo/ama wax jawaab ah aan laga helin. Marka qofku yahay qof aan caymisk ku jirin, waxaa lasoo saari doonaa bayaan ayadoo lagu saleynaayo taariikhda bukaanka laga qaaday masuuliyada ah inuu lacagta iska bixiyo. Lacagta buuxda ee adeegga ayaa la iska rabaa in la bixiyo waqtiga iyo/ama muddo aan ka dambeyn taariikhda bayaanka lacag bixinta koowaad la saxiixay.

6. Damaanad qaadaha ayaa heli doonaa guud ahaan afar bayaan inta lagu jiro muddada 120 maalmood ah. Bukaanada waxay heli doonaan hal bayaan oo ka kooban inta ay isbitaalka joogeyn iyo adeegyada dhakhtarku siiyay. Isla 120-kaas maalmood ee adeegyada lagu bixinaayo kharashka wuxuu taaban doonaa dhammaan waxyaabaha la qaatay. Dhammaan bayaanada waxaa ka qoran in kaalmo dhaqaale la heli karo; lambarka taleefoonka lagala xariiraayo Wakiilka Adeega Macmiilka (CS Rep) ayaa sidoo kale ku jira.

7. Waa masuuliyad saaran bukaanka/damaanad qaadaha inay la socodsiiyaan ururka isbadel kasta oo ku yimaada ciwaankooda ama lambarka taleefoonkooda. Haddii ciwaan cusub laga helo bukaanka, bayaanka iibiyaha ama USPS, heerka cadadka lacagta ayaa la qoondeyn doonaa laga bilaabo muddada 120 maalmood ah. Haddii boosto dib loosoo celiyay la helo, akoonka waxaa loo gudbin donaa hay'ad lacag aruurin si looga boodo raadinta iyo dabagalka.

8. Marka aan la helin lacagta, waxaa laga yaabaa in la sameeyo iskuday lagula xariiraayo bukaanka kadib 45 maalmood oo laga bilaabo marka bayaanka koowaad la diro si loo helo lacagta, loo dejiyo nidaam lacag bixin ama loo bixiyo kaalmo dhaqaale. Haddii aanan awoodin inaan la xariirno bukaanka, wicitaanada dabagalka ah ama fariimaha tooska ah ayaa laga yaabaa inaan u dirno inta lagu jiro mudada lacag bixinta ee 120-ka maalmood. Fariimo dheeraad ah oo lagu kordhinaayo degdega hawsha ayaa kasoo muuqan doona dhammaan bayaanada oo ku dhiirigelinaaya bukaanka inuu la xariiro Waaxda Adeega Macmiilka.

9. Bukaanada/Damaanad qaadaha ee aan awoodin inuu lacagta si buuxda u bixiyo waxaa laga yaabaa in lasoo bandhigo qorshe miisaaniyad. Qorshooyinka miisaaniyada waxaa si qadarin leh u bixiya UVMHN. Haddii bukaan doorto qorshe miisaaniyad, waxaa la filayaa in lacagta waqti sax ah oo joogto ah lagu bixiyo. Qorshooyinka miisaaniyada waxaa laga yaabaa in ugu badnaan la bixiyo 36 bilood ayadoo ku xiran lacagta haraadiga ah ee guud. Haddii bukaanku codsado waqti dheeraad ah, maamulka ayaa xaq u leh inuu siiyo una kordhiyo waqtiga muddo dhan 48 billood. Bukaanada/Damaanad qaadayaasha u qalma kaalmada dhaqaalaha waxaa loosoo bandhigi karaa qorshooyinka miisiiniyada ee leh muddo lacag bixin oo dheeraad ah sida ku xusan xeerarka ku habboon ee Vermont iyo New York.

10. Bukaanada/Damaanad qaadayaasha aan awoodin inay lacagta si buuxda u bixiyaan ama u maraan qorshaha miisaaniyada waa in lala socodsiiyaa ama lagula taliyo Barnaamijka Kaalmada Dhaqaalaha. Wakiilada Adeega Macmiilka wuxuu ogeysiin doonaa uuna ku dhiirigelin doonaa bukaanada inay codsadaan kaalmo. Bukaanada waxaa loo wareejin karaa webseedka dadwaynaha bukaanada ama UVMHN si ay usoo daabacdaan codsiga Khadka onlaynka ah. Wakiilada Adeega Macmiilka waxay codsiga kusoo diri doonaan boosto kadib marka ay uu bukaan/damaanad qaade ka codsado. Marka codsiga loo diro bukaan, akoonada rahman waxay heli doonaan hal bil si bukaanka loogu oggolaado waqti uu ku dhameystiro una soo celiyo codsiga.

11. Bayaanada waxaa kujira dhammaan adeegyada la siiyay bukaanka ee uu bukaanku masuulka ka yahay. In kastoo lacagta lasoo dalacay oo isku dhafka ahna bilaha, arimaha adeegyada shaqsiga da'da ah uu helo ay si madaxbanaan saameyn ugu yeeshaan adeegyada kale. Cid walba waa inay hesho ugu yaraan 120 maalmood oo kharashka lagu bixinaayo lagana bilaabaayo taariikhda lacagta haraadiga ah ee koowaad loo gudbiyay hay'ad lacag aruurisa.

12. Marka la diraayo bayaanada kharashka, wicitaano dabagal oo taleefoon iyo codsiyada kaalmada ee boostada ku guuldareystaan in lagu helo lacagta (lagana joogo muddo ugu yaraan ah 120 maalmood), koontada wayn waxaa loo diri doonaa hay'ad lacag aruurin oo saddexaad si ay dabagal u sameyso.

13. Codsiyada kaalmada dhaqaalaha ee la ansixiyay waxaa hawlahooda dib looga soo celin karaa hay'ada lacag aruurinta inta lagu jiro waqti uu ka mid ah hawsha aruurinta.

14. UVMHN ma sameyso talaabooyin lacag aruurin oo aan habbooneyn, oo ay kujiraan: ka iibinta deynta shaqsiga dhinac sadexaad, la wadaagista macluumaadka xasaasiga ah hay'ad ka warbixinada deynta macmuulka ama urur deyn, u gudbin, ama diidmada ama dalbashada lacag kahor inta aysan bixin daryeelka caafimaad ahaan muhiimka ah sababo ka xariira inuusan shaqsigu bixin mid ama in ka badan lacag bixino horey uu ugu helay daryeel hoos yimaada barnaamijka kaalmada dhaqaalaha, iyo talaabooyinka u baahan sharciga ama nidaamka garsoorka. UVMHN waxay codsi rahmad haysasho ah u gudbin kartaa garsoore ama xal shaqsiga sababo la xariira dhaawacyo soo gaaray shaqsiga ay UVMHN ay siisay daryeelka, tusaale ahaan dhacdada tooska ah.

15. Shaqaalaha UVMHN waxay u hogaansami doonaan sharciyada deegaanka, kuwa gobolka, iyo kuwa federaalka iyo xeerarka la xariira aruurinta lacagta iyo deynta. Xeerka Habraacyada Aruurinta Deynta ee Caddaalada ah ayaa hadda lagu dhaqmaa.

Xaalada Dhukumiintiga: **La ansixiyay**

**QORSHAHA KORMEERITANKA:** Tusaalaha isla xisaabtan akoonada; lacag nidaam uu soo saaray oo la xariria akoonada hore, warbixinta jadwalada dib u eegista lacagaha, wax ka badelka bayaanada, iyo dib usoo celinta uruurinta akoonada ayay dhameyn doonaan Maamulka ama wakiilka Adeega Macmiilka ee loo xilsaaray.

**XEERARKA LA XARIIRA:**
Bayaanka Nidaamka Lacag iska Bixinta ee UVMHN_CUST 7

**TIXRAACYADA:**
Fair Debt Collection Practices Act
IRS 501r
Vermont Act No. 119 (H.287)
45 C.F.R. Part 149

**DIB U EEGAYAASHA:**

| | |
|---|---|
| Katherine Peterson | Xog-hayaha Madax wayne Ku Xigeenka ee Muddada Wareega Dakhliga |
| Chris Cook | Agaasimaha Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka |
| Lynn Combs | Sii hayaha Laanta U Hogaansanaanta iyo Sarkaalka Dhowrista Xogta |
| Erika Smart | Agaasimaha Shabakada Maamulka Khatarta |
| Shannon Keniston | Maamulaha Adeega Macmiilka |
| Adam Trombly | Kormeeraha Adeega Macmiilka |

**MULKIILAHA:** Gina Slobodzian, Agaasimaha Shabakada Adeega Macmiilka

**SARKAALADA ANSIXINAYA:** Michael Barewicz, Wareega Shabakada Dakhliga VP